

# Dalbo dugsigu xanaanada caruurta!

Förskoleförvaltningen



Göteborgs  
Stad



Somaliska

[goteborg.se/forskola](https://goteborg.se/forskola)

# Dugsiga xanaanada carruurta ilmahaagu wax buu ka baran karaa isla markaana wuu ku ciyaari karaa

Dusiga xanaanada carruurta ilmahaagu waxaa uu ka baran karaa waxyaabo cusub isaga oo ciyaaraya, samayanaya hal abuur, samanaya baadhitaan. Carruurta waxaa la siiyaa cunto waxaana gacanta ku haya shaqaale leh xirfad aqooneed. Ilmahaagu waxaa uu yeelan doonaa saaxiibo, waxaa uu wax la baran doonaa kooxo cusub iyo dad waawyn oo wadajira. Dugsiga xanaanada carruurta waxaa manhajkiisa ku jira waxbarasho aasaas fiican u noqon karta ka hor dugsiga waxbarashada. Waxaa kale oo uu ilmahaagu baran doonaa luqada af iswiidhishka. Dusiga xanaanada carruurta waa goob xiiso leh, xasiloon isla markaana waa goob uu ilmahaagu wax ka baran karo.

Waxaa aad ka akhrisan kartaa macluumaad ku saabsan dugsigiyada xanaanada carruurta dugsiyadaa xananada carruurta ee sida gaarka ah loo leeyahay bogga internetka ee [goteborg.se/forskola](http://goteborg.se/forskola). Waxaa aad ka akhrin kartaa macluumaad dheeri ah oo saabsan dugsigiyada xanaanada carruurta dugsiyadaa xananada carruurta ee sida gaarka ah loo leeyahay Meelaha ay yaaliin malfyada la soo daabacan karo oo ku qoran luqada kala duwan.

## Waxaa la bilaabi karaa dugsiga xanaanada carruurta laga bilaabo sanad jir

Qof shaqeyya, wax barta, shaqo raadiye ah ama ku jira fasaxa waalidnimada waxaa aad u codsan kartaa ilamhaaga boos dugsiga xanaanada carruurta. Waa in uu ilmuhu jiraa uga yaraan hal sano marka uu bilaabay dugsiga xanaanada carruurta. Waxaa sidoo kale aad codsan kartaa boos dugsiga xananada carruurta haddii uu ilmahaagu sababo kale oo gaar ah ugu baahanayhay caawimaad gaar ah oo khuseysa horumarkiisa.

## Dhamaan carrurta oo dhan waxaa ay xaq u leeyihiin in ay dhigtaan dugsiga xanaanada carruurta lag bilaabo marka ay jiraan saddex sano

Laga bilaabo bisha ogoosto marka uu ilmahaagu noqdo saddex sano jir, waxaa uu ilmuhu xaq u leeyahay in uu dhigto dugsiga xanaanada carruurta 15 saacadood todobaadkiiba. Waxaa uu arinkani khuseeya dhamaan carruurta oo dhan, xitaa haddii aad joogto guriga oo aanad waxba qaban. Dugsiga xanaanada carruurta waa bilaa lacag.

## Sidan hoos ku xusan baa loo codsan karaa

Waxaa codsan kartaa dugsiga xanaanada carruurta ama dugsiyada xanaanada carruurta oo sida gaarka loo leeyahay ugu horeyn lix bilood ka hor wakhtiga uu ilmahaagu u baahan doono booska. Waxaa aad codsiga ka sameyn kartaa adiga oo adeegsanaya adeega elaktarooniga (e-tjänst) ee ku jira bogga internetka ee [goteborg.se/forskola](http://goteborg.se/forskola)

Haddii aanad lahayn tobanka lambar ee aqoonsiga ama aanad rabin in aas isticmaasho adeega elaktarooniga (e-tjänst) waxaa aad codsiga sameyn kartaa adiga oo isticmaalaya in aad buuxiso foom warqad ah. Foomu waxaa uu ku jraa oo aad kala soo bixi kartaa bogga internetka ee [goteborg.se/forskola](http://goteborg.se/forskola).

## Dugsiga xanaanda ee furan

Ka hor unta uusan ilmaahaagu bilaabin dugsiga xanaanada carruurta, waxaa adiga iyo ilmahaagu si wadajir u booqan kartiin dugsiga xanaanada carruurta ee cid kasta u furan. Dugsiyada xanaanda carruurta ee furan waa goob ay kulmaan qoysaska leh carruur ay da'adoodu u dhaxeyso 0–6 sano. Booqashada dugsiyada xanaanada ee furan waa bila lacag isla mrkaana looma baahna in la isa sii diiwaan galiyo. Bogga internetka ee [goteborg.se/oppenforskola](http://goteborg.se/oppenforskola) waxaa aad ka akhrisan kartaa macluumaad ku saabsan goobaha ay ku kala yaalaan dugsiyada xanaanada carruurta ee furan iyo waxyaabaha lagu qabto.

## Su'aalo iyo caawimaad

Wixii su'aalo ah oo ku saabsan xanaanada carruurta iyo codsiyada waxaa aad la xidhiidhi kartaa xarunta a adeega dugsiyada xanaanada.

Lambarka telefoonka: 031-365 09 60

Wakhtiyda laga jawaabo telefoonka: isniin–jomcaha, saacada 8–16.30

Haddii aad u baahato caawimaad sida loo buuxiyo foomka, waxaa aad booqan kartaa xafiiska adeega dadweynaha (medborgarkontor) ee kugu dhoow. Waxaa aad heli doontaa caawimaad dad hawl wadeeno ku hadli kara luqada badan oo kala duwan.

